

Oggolaanshaha tallaalka covid-19

Warbixin iyo usoo bandhigid tallaalka covid-19

Waxaa hadda jira tallaalka loo qaato covid-19 oo lasoo ansixiyay oo loogu talo galay carruurta oo faa'idada laga helo loo yeeshay aqoon tii hore ka badan. Hey'adda caafimaadka dadwaynaha waxay soo jeedinaysaa tallaalka caam ah oo loo qaadanayo covid-19 laga soo bilaabo da'da 12 sano, laga bilaabo 11 oktoobar 2021. Taladu waxay qusaysaa tallaalka aasaasiga ah ee labada jeer la qaadanayo ee tallaalka mRNA. Hey'adda caafimaadka dadwaynaha go'aankeeda waxaa la gaaray iyadoo laga eegayo waxa ilmaha u fiican, iyadoo loo arkay in qaadashada tallaalka dheefteeda ay ka badan halisaha ay ku keeni karto shaqsiya ilmaha ah.

Waddanka Iswiidhan tallaalka covid-19 qofku ikhtiyaar buu u leeyahay bilaash buuna u yahay dhammaan dadka raba inay iska tallaalaan cudurka. Foomkaan waxaad kusoo sheegi kartaa haddii aad rabtid in ilmahaaga la tallaalo ama aan la tallaalin adigoo isku tillaab soo saaraya afar geesyada hoos ku yaal.

Haddii waalidku diido ama uusan oggolaansho soo gudbin waxay la micne tahay in ilmahaaga aan la tallaali doonin, haddii ilmuhu uusan isagu rabin in la tallaalo oo lagu qiimayn inuu yahay qof caqliyan qaangaar ah oo iskii u oggolaan kara tallaalka. Si waxtar dhamaystiran looga helo waxaa tallaalka la bixiyaa labo jeer oo asbuucyo u dhexeeyaan, warbixin intaa dheer waxaa la bixiyaa markii tallaalka la qaadanayo. Caddaynta tallaalka labada tallaalka way ku jiraan.

Tallaalka ka hor waxaan kaa codsanaynaa inaad kasoo jawaabtid su'aalaha ku jira Caddaynta xaaladda caafimaad ee qusaysa ilmahaaga ee aan kusoo lifaaqay halkaan [Hälsodeklaration inför vaccination mot covid-19.pdf \(vgregion.se\)](#)

Caddaynta xaaladda caafimaad oo cusub ayaa la buuxinayaa ka hor tallaalka 2aad.

Magaca ilmaha: -----

Lambarka aqoonsiga shaqsiya ah ee ilmaha: -----

- Haa, waan oggolahay in ilmahaaga laga tallaalo covid-19
- Maya, ma rabo in ilmahaaga laga tallaalo covid-19

Saxiixa magaalada:

Taariikhda:

Saxiixa waalidiinta/ cidda ilmaha ka mas'uulka ah Waadixinta magaca Telefoonka maalinta laga helo

Saxiixa waalidka/ cidda ilmaha ka mas' uulka ah Waadixinta magaca Telefoonka maalinta laga helo

Waxaa saxiixaya labada waalidba haddii mas' uuliyadda ay wadaagaan.